

## **Sanduuqa Dhaqaalaha ee Koofurta King County (SKCF) waxuu Bilaabaya Barnaamijka Deeqaha Deegaanka**

Deeqahu waa isu dheelitir illaa \$ 20,000 oo lagu maalgeliyaan mashaariicda bey'adeed ee bulshooyinka u dhow garoonka diyaaradaha.

SEATTLE - Kooxaha jaaliyaddahu waxay hadda codsan karaan maalgalinta ay bixineyso Dekeda Seattle-Port of Seattle si loo hagaajiyo bey'adda deegaanka ee bulshada ku dhaqan agagaarka garoonka diyaaradaha. Barnaamijka Deeqaha Deegaanka ee cusub ee Koonfurta King County wuxuu taageeraa waxqabadyada sida hagaajinta meelaha dadweynaha leeyahiin, qalabka farshaxanka sameynta, ama mashruuc deriska ah ama mashruucyada maamulka deegaanka ee Burien, Des Moines, Federal Way, Normandy Park, SeaTac iyo Tukwila. Soo-jeedinta waa in la soo gudbiyaa ugu dambeyn Diseembar 4, 2020. Deeqaha la bixinayo waxay noqon doonaan illaa \$ 20,000.

Barnaamijka Deeqaha Deegaanka ee [Koofurta King County 'SKCF'](#) waa wareegga cusub ee Sanduuqa Koonfurta King County. Wareeggii ugu horreeyay ee Sanduuqa, waxaa diiradda lagu saaray dib u soo kabashada dhaqaalaha, waxaa la bilaabay Ogosto 2020. Barnaamijka Deeqaha Deegaanka [Airport Community Ecology \(ACE\) program](#) waxaa loogu talagalay bulshooyinka badan oo ku xeeran madaarka Seattle-Tacoma International Airport (SEA). Bulshooyinka ku nool Koonfurta King County waxay si aan isu dheelitirneyn ula kulmaan waxyeelada xagga deegaanka oo ay taariikh dheer u leeyahiin sinaan laanta dhaqammada isticmaalka dhulka iyo barakac dhaqaale oo u riixaya bulshooyinka la faquuqo in ay fogaadaan oo ay u sii fogaadaan koonfurta. Saameynta caafimaad iyo dhaqaaleed oo ay u dheeri tahay COVID-19 dadka dakhligoodu hooseeyo iyo bulshooyinka midabka leh, waxaa jira baahi ka xoog badan tii hore abid oo loo qabo maalgashi Koofurta King County, halkas oo deggeneyaashu ay fursadooda helitaan ee jardiinooyinka iyo meelaha cagaaran ay yartahay marka loo eego dadka kale ee degmada ku nool.

Dekedda waxay ballanqaaday \$10 milyan oo doolar oo maalgelin ah inta u dhexeysa hadda illaa 2023 oo loogu talagalay Sanduuqa Koonfurta King County. Barnaamijyada Deeqaha Deegaanka ee SKCF, waana \$435,000 oo maaliyad ah ayaa la heli karaa sanadka 2020. Mashaariicda waa in lagu qabtaa meel dadweynaha ay leeyahiin waana in ay dal-badayaashu la yimadaan sedex melood meel 3: 1, taasoo la micno ah in dollar kasta oo ay bixiso dekeddu ay tahay inuu u dhigmo saddex doolar deeq- qaatahu ama mashruucyada la shaqeeya. Dekeddu waxay ogoshahay dhowr dariiqo oo lagu sameyn karo is dhignaansha oo ay ku jiraan waqtiga tabaruca, ka qaybgalka howlaha dadweynaha, saacadaha qofku shaqada qabtay, qiimaha deegaanka ee geedo beerida, dhimista kaarboonka qiiqa, tabarucaadka nooca ah, tabarucayaasha la-hawlgalayaasha mashruuca, iyo lacag caddaan ah.

"Ilaalinta deegaanka iyo maalgashiga bulshada ayaa udub dhixaad u ah jawaabtayada iyo istaraatijiyyadda soo kabashada ee COVID-19," ayuu yiri Komishiner Stephanie Bowman.

"Sanduuqa Koofurta King County wuxuu mudnaanta siinayaan bulshooyinka sida aadka ah ay u

saameeysay cadaaladda darada deegaanka wuxuuna mudnaanta siinayaa maalgashiga ku saleysantahay sinnaanta bulshada ee ku dhaqan agagaarka garoonka diyaaradaha."

Barnaamijka Deeqaha Deegaanka Koofurta King County 'SKCF' waxuu sii wadayaa shaqada Sanduuqa ACE, isagoo garoowsan in bulshada deriska la ah garoonka dayaarada ay saamayn badan ku yeelato howlaha garoonka sidoo kalana la kulmaan faa'iidooyin badan. Tan iyo markii la bilaabay 2016, Sanduuqa ACE wuxuu dhaqaale siiyay 42 kooxood oo bulshada ka mid ah in ka badan \$360,000 deeqo yar oo isbarbar dhiga oo loogu talagalay mashaariicda horumarinta deegaanka ee bulshada. Abaalmarintii hore ee ACE waxay taageereen mashaariic dib loogu soo celinayo deegaanka dadka Native ka ah, dhalinyarada lagu wacyi geliyo arrimaha deegaanka iyo joogtaynta, la dhiso lana hagaajiyo kaabayaasha cagaaran ee roobka si loo yareeyo wasakheynta. Liiska dhan oo ah mashaariicdii ACE ee horey loo maalgeliyey ayaa laga heli karaa [halkan](#).

### ***Sanduuqa dhaqaalaha Koofurta King County (SKCF)***

Dekedda Seattle waxay aasaastay [Sanduuqa Koonfurta King](#) ee Sannadka 2019 si loo horumariyo iskaashi ku saleysan sinnaan iyo in la siiyo ilaha iyo taageerada bulshooyinka ka agdhow garoonnada taariikh ahaana aan helin adeeg, iyadoo laga hadlayo yareynta buuqa, caafimaadka deegaanka iyo joogtaynta. Iyada oo laga jawaabayo saameynta xun ee dhibaatada COVID-19, Komiishinka Dekedda waxay ku dareen horumarin dhaqaale oo diirad dheeri lagu saarayo in lagu bixiyo maalgelinta. Wareeggii ugu horreeyay ee deeq-lacageedka Sanduuqa, oo hadda socda, wuxuu diiradda saarayaa taageeridda ka-soo-kabashada gobolka ee saameynta cudurka faafa ee COVID-19. Tan waxaa ka mid ah qayb ah hagaajinta deegaanka, iyada oo la ogyahay in helitaanka meelaha cagaaran hadda looga baahan yahay sidii hore wax ka badan.

"Inti lagu gudajiray waqtiyadan tijaabada ah ee aafada, bulshooyinkeenu waxay waqtii badan ku bixinayaan waxbarashada banaanka, beerashada, iyo jimicsiga iyagoo ku lugeynaya jardiinooyinka deegaanka. Annaga oo taageereyna mashaariicda deegaanka ee Koonfurta King County, waxaan xoojineynaa bulshooyinka aan sida caadiga ah u helin cunnooyinka caafimaadka qaba waxaanan siineynaa fursad ay ku ogaadaan xiriiro cusub oo ay ku bartaan xirfado cusub oo ku saabsan shaqaalaynta mustaqbalka," ayey tiri Vicky Navarro, oo ka tirsan dadka ku nool Federal Way.

Soo gudbi soo jeedintaada Disember 4, 2020 12:00pm.

Waxii Faahfaahin dheeraad ah iyo qaabka soo jeedinta waxaa laga heli karaa

<https://www.portseattle.org/programs/south-king-county-fund-environmental-grants-program>